

## Ku raaxayso quraacda canjeelada Istaambiid (Stampede) ee lacag la'aanta ah ee Gudoomiyaha

Iuulyo 4, 2022

Qof kasta waxaa lagu casuumay inuu ku raaxaysto cunto lacag la'aan ah, muusig iyo madadaalo Istaambiid (Stampede) ah ee 11ka Luulyo marka Xarunta Kaalgari MakDuugal (Calgary's McDougall) ay martigeliso quraacda canjeelada ee Istaambiid (Stampede) ee Gudoomiyaha.

Xubnaha golaha sharci dejinta ee gobolka Alberta ayaa quraac dhaqameed reer galbeedka ku siin doona dhawaaqyada muusiga tooska ah, laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 9 subaxnimo

"Iyadoo ruuxa dhabta ah ee martigelinta Kaalgari Istaambiid (Calgary Stampede), kaalay nagu soo biir! Maxaa ka fiicnaan kara inaad fadhiisatid quraac macaan oo canjeelo macaan ah, ukunta la dubay iyo soosaj (sausages), iyo dhageysiga muusiga weyn ee fanaaniinta maxalliga ah? Dhammaan adigaa iska leh inaad bilaash ugu raaxaysato."

*Jason Kenney, Gudoomiye*

Xarunta MakDuugal (McDougall) waxay ku taal magaalada hoose ee Kaalgari (Calgary) ee 6 Street iyo 4 Avenue, oo leh C-tareen u dhow si fudud loo galo.

### Warbaahinta kala duwan\* (optional)

Daawo sawirka dhacdada ([View the event photo](#))

Dhageyso shirka jaraa'id ([Listen to the news conference](#))

Daawo shirka jaraa'id ([Watch the news conference](#))

\*Waxaa la heli karaa dhacdada kadib

### Weydiimaha warbaahinta

Justin Brattinga  
Justin.Brattinga@gov.ab.ca  
780-203-0177

Xoghayaha Warfaafinta, Xafiiska Gudoomiyaha